


# U IMAATINKA RUMEYSADKA MASIIX

John Benton

# U IMAATINKA RUMEYSADKA MASIIX

Farrinta ku jirta Ktaabka Qudduuska waxay ku bilaabantaa Ilaah. Maxay tahay Ekaanshaha Ilaah?

John Benton

***Ilaah waa Abuuraha Dunida iyo Qof Walboo ku dhex jira.***

Xeerarka Ilaah ee abuuritaanka iyo wax walboo dhacay Isagaa go'aansaday sababtoo ah Ilaah baa ina samaystay, waxeynu nahay duunyadiisa oo sidii uu doonoo inaga yeelaa.

Inkastoo Ilaah abuuray waxwalba uuman, dadaka keliya ayuu ka abuuray ruux nool haddana jidh ah. Asal ahaan ninka (Dadka) si daahirsan baa loo abuurray oo u ekaanta Ilaah ah, noole jira oo aad ugu dhow xidhiidhna la lehIlaah oo sida aabbe u ah aadna ugu farxa gundheerida saaxiibtinimo ee uu la leeyahay. Laakiin qofkii ugu horreeyey baa carqaladeyey oo ku fallaagoobay Ilaah. Falkaa dartiidhammaan tafiirtii bani'aadankaa waxey ku hoos daceen xukunka Ilaah.

***Ilaah waa ka qarsoon yahay indhahayaga laakiin wuu na arkaa oo waxwalbana ogyahay.***

Hubsasha la;aanteenna taasi, Ilaah meel walba wuu joogaa, oo ma jiri karto wax aan ka qarin karno Isaga. Xitaa wuxuu arkaa oo uu daalacdaa maskaxdeenna oo wuu inga sii ogyahay inta aynu isgaraneyno inaga.

1. Bilowgii 1:1; Kolosay1:16.
2. Sabuurada 115:3; Maahmahyada 16:33; Rooma 1:26.
3. Bilowgii 1:26.
4. Bilowgii #:11-12; Rooma 5:18.
5. Kolosay 1:15; Cibraniyadda 4:13.

## *Ilaah waa Qudduus.*

**Q**udduusnimada Ilaah micnaheedu waxaa weeyaan Ilaah wuu wanaagsan yahay meesha ugu sarreysa xagga dareeenka garashada, wuu rogay oo gediyey wixiisii fiicnaa ee aan iinta lahayn. Ilaah asal ahaantii waa nadiif oo neceb waxwalboo shar ah. Kitaabka Qudduuska waxa uu inoo sheegaa Qudduusnimaada Ilaah iney tahay iftiin ku dhex jira meel aan gudcur uusan ka jirin, Isagu haddaba wuxuu muteysatay cisad iyo xushmad iyo xurmad iyo cabsi.

## *Ilaah waa Sadexmidnimo*

**I**nta badan qirashadeenna ma fahmi karno inaga qudheenna, oo waxaan nidar ku hubsanay in aan weligeen fahmi kain waxwalba oo ku saabsan Ilaaha Weyn ee ina abuurtay inaga. Ereyga Ilaah, wuxuu inoo sheegaa inaga waxyaabo badanoo ku saabsan Ilaah oo aan inaga ku fahmi karno Isaga. Wuxuu inoo sheegaa inuu jiro hal Ilaah oo keliya, laakiinse ka kooban saddex qofood hal isku ah ahna hal Ilaah, waxaa jira Aabbaha, Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska. Mid walbana midka kale ayuu la siman yahay xagga awoodda iyo ammaantaba, halkaasooy aysan jirin saddex Ilaahood laakiin hal Ilaah keliya.

***Ilaah waa Jacayl.***

Caadiyan waan jecelnahay dadka ina jecel. Laakiin, jacaylka Ilaah aad buu uga qoto dheer yahay oo uu uga weyn yahay nooc walboo jacayl ah. maalin walba Ilaah waxa uu ina tusaa jacaylkiisa iyo wanaagga uu u hayo dadka cadowgiisa khadhaad ah.

1. Ishacyaah 6:3; Timateyos 6:16; Yooxanaa1:5.
2. Matayos 28:19; Yooxanaa 3:18; Falimaha Rasuullada 5:3-4.
3. Matayos 5: 45; Yooxnaa 3:16.

***Waa Maxay Dembiga?***

Ilaah waa Ilaaha abuurtay dadaka (ninka), oo siiyey iyga sharci ay ku noolaadaan.

Sharicgaa oo inga inoo wanaagsanaa qudheenna. Sidan buuna inoogu xisaab xiray nacam waxa laynaga doonaya ay ahayd:

1. Waa inaanan caabudin wax kale Ilaaha runta ah mooyee.
2. Waa inaan fikrad khalad ah ka qabin waxyaalaha ku saabsan Ilaah, oo keliya caabudno Isaga sida ay tahay fikradda Kitaabka Qudduuska uu ina farayo.
3. Waa inaan magaca Ilaah u soo qaadan ama si micno la’aan ah amase aan ku dhaaranin Erey.
4. Waxaa ingu waajibay in maalinta Ilaah ee Axadda oo ah maalin si gaar ah loogu dhigay Ilaah, oo uu

dhammaystirantay howshii lixda cisho ee ka horreysay uu qabtay sida ku xusan maalmaha toddobaadka.

5. Waxaa inagu waajib ah inaan ixtiraamno oo aan jeclaano waaladiinteenna (Aabbo iyo Hooyo) oo aan addeecno iyaga.
6. Waa inaanan dilin dadka oo aan necbaanin ka fikirkeeda dadka kale.
7. Waa inaanan sineysan, xagga jidhka iyo xagga masakxdaba.
8. Waa inaynaan wax xadin.
9. Waa inaynaan been sheegin .
10. Waa ineynaan ku hinaasin dadka intiisa kale.

Dembigu waa jabinta sharciga.

1. Baxniinta 20:1-17; Matayos 5: 21-32.
2. 1 yooxanaa 3:4.

Wax xun kuma jiraan sharciyadan wanaagsanna ma jabiyaan sharciga. Ciise wuxuu yidhi laba xeer oo wanaagsan bay ku soo koobmaan:

“Waa inaad Rabbiga Ilaahaaga ka jeclaataa qalbigaaga oo dhan, iyo naftaada oo dhan, iyo xooggaaga oo dhan, iyo caqligaaga oo dhan, deriskaaga waa inaad u jeclaataa sida naftaada”.

1. Rooma 7:12.
2. Luukos 10:27-28; Markos 12:30-31.

## *Sharciga iyo Qudheenna*

Iminka inta aan akhrineynay sharciga waxaanu soo ogaanay oo aan xaqiiqsanay labadan waxyaalood:

Midda koowaad caqligeenna waxa uu inoo sheegaa inuu sharcigan sax yahay oo uu wanaagsan yahay.

Midda labaad, waxaan ogaanay oo aan xaqiiqsanay inaysan jirin mid inaga mid ah inaga oo dhowri/ilaalin kara sharcigan, xitaa haddii aannu daacad nahay, ma samayn karno xitaa haddii aannu dooneyno taasi. Waa maxay sababtu ama waayo? Ilaah taasi waxa uu ka yidhi sababteeda, waxaynu wada nahay Dembiilyaal. Tan iyo ilaa qofkii (dadkii) ugu horreeyey ka fallaagoobeen (mucaaradeen) Ilaah, dabcigeena jacaylka samaynta waxyaalahaa xumaanta ah ayaa jabiy sharciga Ilaah.

Marka aannu jabino sahrciga Ilaah waan aflagaadeynaa oo aan caynnaa Isaga, oo wajiga ayaan candhuuf kaga tufnaa. Ilaah ma adka, xiqdina ma leh, Ilaah wuu gaabiyaa cadhadiisa. Laakiinse, qalbiyadeenna dembiga miiran ah iyo sharkeenna ayaanu ku samaynaa in cadhada Ilaah inagu dhacdo oo na cabsi gelisa. Ilaah dembiyada oo idil wuu ciqaabaa. Xaqiiqdii waxey tahay cadhada Ilaah waxay ku dhacdaa dhammaan dadka rag iyo dumarba oo ay qeexiddeeda guud ay tahay xaalka ay ku sugan tahay dunida, ilaa ay cadhadiisa ay inaga dulqaadanto, marka aan dhimano ka dib wuxuu inoo diri doonaa naarta oo khibraddeedu tahay cadhada Ilaah ee abiyadanka ah.

“Ha ka baqina kuwa jidhka dila, laakiin aan karin iney nafta dilaan, waxaadse ka baqdaan kan jahanamada ku halaaggi kara nafta iyo jidhkaba”

1. Rooma 3:23; Rooma 3:10-12; Wacdiyaha 7:20.
2. Sabuurrada 103:8.
3. Baxniinta 34:6-7; Sabuurrada 7:11; Rooma 1:18.
4. Matayos 25:31-46; Muujinta 20:11-15.
5. Matayos 10:28.

***Shaqadii Ciise Masiix***

Dadka oo idil waxey ku hoos jiraan cadhada iyo inkaarta Ilaah sababta oo ah dembigooda. Laakiin Ilaah halkaa kagama hadhin. Wuxuuna u sameeyey shay aad faa;ido ugu leh oo qiimo badan iyaga. Wiilka Ilaah baa soo noqday qof caadi ah sideenoo kale. lagamana joojinini inuu ahaado waxa uu weligii ahaaba – Ilaah, laakiinse wuxuu yimid si ka duwan siduu horey u ahaa – nin bani’aadmi ah oo kale. qarnigii ugu horreeyey ayuu ku dhashay magaalada Baytul-laxam oo ku taalla wadanka Israa’iil oo waxaa la siiyey magaca ah Ciise, wakhigiisa inta badan noloshiisa wuxuu ku qaatay nijaarnimo ee magaalada Nasaret. Sida qof ahaan wuu ka yara duwanaa dadka intiisa kale gaar ahaan hal shey, ma uusan ahayn dembiile. Mana dembaabin abid intuu dunida joogay. Ciise wuxuu dhammaystiray sahrcigii Ilaah mel walba oo aad ka eegtid. Ku dhawaad sanadihii cimrigiisa markuu ahaa soddomeeyo ama soddon jira, saddex sanadood ka hor intaanan lagu deldelin Yerusaalem. Ciise wuxuu bilaabay inuu dadka u sheego iney rumeystaan Isaga inuu

yahay Wiilka Ilaah oo ay soo raacaan Isaga. Intii lagu jiray xilligaas wuxuu sameeyey mucjisooyin badan, haddaba si dadku u arkaan in sheegadiisa ah inuu Ilaah yahay iyo Wiilka runta ahaa.

Maxay tahay runta sababta dadka uu ugala murmay iney Isaga aaminaan? Sababtu waxey ahayd qorshaha Ilaah ee uu doonayey iney dadkoo idil ku badbaadaan, oo uu ka soo samato bixiyo dadak xumaantii soo jireenka ahayd ee dembiyadooda. Isagu wuxuu aaminsanaa Wiilka inuu u noqdo nolosha weligeed ah oo qofka aan aaminin wiilka arki doobnin nolosha; laakin ay dushiisa ahaan doonto cadhada Ilaah.

1. Efesos 3:4.
2. Yooxanaa 1:1-14; Timateyos 1:16.
3. Rooma 8:3; 1 Butros 2:28.
4. Yooxanaa 3:36.

## *Ciise Masiix Wuxuu Galay Meeshii Ay Ahayd Iney Galaan Dembiilayaasha*

Beddelaadda waa qof qaata meel qof kale ay ahayd inuu galo. Ubucda qalbga Warka Wanaagsan waxaa weeyaan ku beddeliddii Ciise, maxayse tahay ka micne ahaan? Waxaan aragnaa inuu Kitaabka Qudduuska uu ina barayo dembiga oo idil in la ciqaabi doono. Dembi ma jiro, mid yar iyo mid weyn ah oo waa isku wada mid dembiga. Dembi walba waa in la xisaab xiraa oo la bixiyaa. Laakiin Ilaah wuxuu caleema saartasy laba meelood ee uu ku ciqaabo dembiga ugu

dambayntii. Mid waa cadaabta, midda kalena wa iskutallaabta Ciise Masiix. Naartu waa meesha ugu dambaynta weligeed ah ee ay dadku ku rafaadi doonaan ciqaabta dembiyadooda awgeed. Iskutallaabtuna waa meeshii uu ku rafaaday Wiilka aadanaha. Ciise Masiix; ku xanuunsaday, kuna rafaaday sida ku xusan taariikhda dembiyada ee aysan u ahaanin Isaga. Wuxuu u silcay dembiyada dadka ama kuwa kale. Waayo Masiix mar bey ahayd inuu u silco dembigaaga daraadiis. Xaqii baa xaq la'aani noqday, taas oo inoogan timid Ilaaha Qadirka, ooy inoo ahaato geerida jidhka.

Xanuunka uu Ciise uu ugu adkaystay iskutallaabta dusheeda waxay ahayd waxa aad iyo aad uga fog in ka badan qalalaasaha dhimasho. Wuxuu u silcay cadhadii Ilaah oo uu qaatay xukunkii ciqaabta ee dembiga si dhammaystiran. Ciise Ilaah wuxuu u xushay inuu ahaado bedelka beddelaadda, wuxuuna qaatay Ciqabtii ay ahayd iney ku dhacdo Bani'aadanka intiisa kale oo dhan, deedna wuu ka rogay dembiyadoodii. Mana uusan u dhimanin qofwalba, laakiin, wuxuu u dhintay meesha ay ahayd gaar ahaan shakhsiyaadka.

1. Rooma 6:23; Bilowgii 18:25; Rooma 12:19.
2. Markos 9:43 -48; Ishacyaah 53:4-12; 1 yooxanaa 4:10.
3. 1 Butros 3:18.
4. Matayos 27:46.

Shakhisyaadkee Dee? Cidwalba oo Isaga rumeysata wuxuu u dhintay jagadoodii/booskoodii dhamaan jiilwalba oo aamina Isaga.

Ciise wuxuu yihdi: "Waxaan ahay adhijirka wanaagsan, adhijirka wanaagan wuxuu naftiisa u bixiyaa, Idahaygu codkaygat maqlaan, waxaan garanayaa iyga weyna i raacaan aniga"

## ***Qumanaan ula Istaagidda Ilaah***

Ciise wuxuu ku dhintay iskutallaabta dusheeda, waa laga soo dejiyey oo la aasay. Laakiin saddex cisho ka dib wuu soo noolaaday. Ilaah baa ka sarakiciyey geeridii, dib dambana uma dhimmanayo. Middaana waa caddeynta Ilaah ee uu dembiilayaashu ee Ciise ugu hibeeyey naftiisa inuu si buuxda u qaatay xisaabtoodii. Waxay ahayd waddo uu Ilaah inaga tusayey in Ciisahaa xaqiiqdii ka samata bixiyey dadaka ganaaxii ciqaabeed ee dembiga. Ilaah wuu ka soo sarakiciyey geeridii, wuxuu siiyey ammaan, iney dadka rumeysadkaada iyo rajadaadu Ilaah qaadirka ah u ahaato.

Ciise wuxuu u dhintay kuwa uu Ilaah jeclaaday oo uu kula midoobay qorshihiisii u degsanaa Isaga kolkeedii horeba. Waxey ahayd oo keliya, sidey doontaba ha ahaatee, markey dembiilayaasha rumeystaan Masiixa in laga cafiyey dembiyadoodii oo ay la midoobeen Masiixa oo ay khibraddiisa ugu noqotay taasi Warka Wanaagsan ee

Injiilka, Ilaahna uu ku dhowro rumeysadka dembiilayaasha sida ay hadba shakhsi ahaan u addeecaan uguna silcaan sidii Ciise uu u adedeecay uguna silcay oo kale, sababtoo ah waxey la midoobeen Isaga. Ilaah waxuu kula macaamilay Ciise xisaabtii u taalay ee uu Masiix u qalmay.

Rumeystayaaasha waxaa ku waajibay iney yidhaahdaan:

Nolosha aniga kuma nooli,
Dhimashadu aniga kuma dhiman,
Nolol kale, dhimasho kale,
Waxaan aaminsanahay,
Daa;inka abid aan dhamaaneyn.

Dembiyadii dadka Masiix baa bixiyey oo cafiyey, oo adeegiddii saxda ahayd ee Masiix ayaa hubaal u noqotay aqbalaaddoodii Ilaah, taasi waa sida ay tahay dadaku eey ku hor saxan yihiin Ilaah hortiisa.

1. Yooxanaa 10:11-27; Rooma 8:28-29.
2. Yooxanaa 20:21; Falimaha Rasuullada 2:24-32; 1 Korintos 15:3-8.
3. 1 Butros 1:21.
4. Efesos 1:3-14.

## *Sidee Baan ku Badbaadi karaa?*

Ilaah ma i aqbalayaa marka aan isku dayo inaan ku noolaado nolol wanaagsan? MYA!

Miyaan badbaaday haddii aan xajiyo ballanyadii Ilaah oo aan si fiican wnaag u samaaeyo? MAYA!

Haddaba sideen baan ku badbaadi karaa?

Waxaa jira waddo keliya oo lagu badbaado. Inaad ka soo jeedsatid dembiyadaadiin oo aad heshid Ciise Masiix inuu kuu ahaado Badbaadiyhaaga.

1. 2 Korintos 5:21; Filiboy 3:9.
2. Ishacyaah 64:12.
3. Falimaha Rasuullada 4:12
4. Falimaha Rasuullada 16:31.

Ciise wuxuu yidhi sidatan "Anigu waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha; nina Aabbaha uma yimaado xaggayguu ka yimaado maahee."

Kitaabka Qudduska wuxuu ina baraa waxyaalo cajiib ah, laakiin inta badan mid ka mid ah mucjisooyinkaa xaqiiqadeedu waxay tahay in qofka caadiga ah rag iyo dumarba inuu dembiyadooda uu cafiyo Ilaah. Albaabkii badbaadadana uu si baaxadweyn u furmay. Sayid Ciise Masiix wuxuu yidhi sidatan: "Ii kaalaya kulligiin kuwiina hawsheysan oo culaanaysan, oo aniga waan idin nasin doonaa." Qofka dembiyadiisa Ilaah ka cafiyo oo deedna sidaa u yaqaano, oo addeecay Ciisa Masiix inuu isaga ama iyada u yahay Rabbigiisa iyo saaxiibkii ee loogu yeedho Masiixi. Laga yaabee, inaad su'aalo ka qabto waxyaalaha ku saabsan inaad Masiix noqoto. Xussuusinta buugan yar waa

inaan ka fekernaa su’aalaha caadiga ah ay dadku u badan yihiin weyddiinteeda.

1. Yooxanaa 14:6

2. Matayos 11:28

### ***Ma Qiimo Ayey inoogu Fadhidaa in La Noqdo Masiixi?***

Ma iibsan karnaa cafinta dembiyada? Waa haddiyad bilaash ah oo xagga Rabbiga ka timid. Laakiin haddii aad noqoto Masiixi micnaheeda waxaa weeyaan in mustaqbalka Masiix uu ku hoggaamin doono noloshaada. Wuxuuna kuu sheegayaa inaad iska deyso waxyaalihii aad noloshaada ku soo samayn jirtay oo idil. Wuxuu kuu sheegi doonaa inaad sanmayso waxyaale kale oo aad weligaa aadan Ilaah hortiisa ku samayn. Ereyga Ilah baa haga nolosha Masiixiyiinta. Dadku laga yaabaa iney kuugu qoslaan ahaanshaha Masiixiyiyaddaada awgeed. Laga- yaabee iney kaa soo horjeestaan oo kuugu kacaan asxabtaada iyo saaxiibadaadaba oo xitaa qaar ka mid qoysakaaga. Wax sahlan ma ‘aha waxakan oo idil. Qaar baa aad u adag. Laakiinse qiimo ayey ku fadhidaa ahaanshaha saaxiibkaa cusub iyo kaad raacday ee Ciise Masiix.

### ***Sideen Baan ku Garan doonaa in Masiix I Aqbali Doono?***

Ma waxaa jira wax ka horreeya inaan sameeyo inta aanan Ilaah wyddiisan inuu i badbaadiyo? ……………. ..MAYA.

Mise ma loo baahan yahay inaan dareemo xaadirnimad Ilaah ee jid gaar ah inta aanan weyddiinin Isaga inuu i badbaadiyo? ……………………………………MAYA.

Ma dembi miiran anigoo ah baan badbaadi? ……..MAYA.

Jawaabta su'aalahan oo idil iyo su'aalaha noocan oo kale ah ee ay dadku isweyddiyaan in Masiix diyaar u yahay inuu qaabilo cidwalba. Kaad tahayba adigu, iyo waxwalboo aad sa,maysaba, wax walba oo aad dareemeysidba, Ciise wuu ku casuumay adiga, haddaba sidaad tahay ee aad ugu timaaddo Isaga wuu ku badbaadinayaa. Hana ugu iman Masiix adigoo jilayo ama iska dhigdhigayo in aad qofka aad u wanaagsan tahay runtii mid ka duwan qofkii aad ahayd kolkii horebab.Xusuuso Ciise wuu ogyahay in ka badan intaad is ogtahay adigu. Wuxuuna yidhi sidatan:

"Dhammaan wuxuu Aabbaha I siiyey way ii iman doonaan, oo kii ii yimaadana ma eryi doono." Noqoshada Masiixinimada qofka waxaa ku waajib ah inuu ka toobadkeeno dembiyadiisa oo uu rumeysto, aaminana Ciise MAsiix inuu badbaadin karo naftiisa.

## *Maxey Tahay Micneynta ka Toobadkeenidda Dembiga?*

Waa inaad rumeysata in Ilaah u soo diray Wiilka dunida sidii ay qorshihiisii uu ahaa inuu ku soo bandhigo Isaga, " Ilaah intuu jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay in mid kastoo Isaga rumeystaa uusan lumin oo uu lahado nolosha weligeed ah." Laakiin rymeysdka aad u rumeysatay

ayaa ku badbaadiyey adiga. Ku xiran Isaga un keliya. Sidee baad ku garan kartaa haddii aad aaminto Isaga? Marka aad qof aaminto waad dhagaysanaysaa isaga o wuxuu ku yidhaahdo ayaad samaynaysaa sow ma'aha! Sidaasoo kale weeyaan markaan aamino ama rumeysano Ciise.

1. Yexesqeel 14:6; Falimaha Rasuullada 26:20.
2. Yooxanaa 3:16.
3. Falimaha Rasuullada 15:11; 2 Timateyos 1:12.

***Waxaan aad u Dareemaa Daciifnimo inaan u Toobadkeeno oo aan Rumeysto Ciise; Si Sahlanna waan iskaga Daayaa; Maxaan Sameeyaa ?***

Midna mid inagama mid aha mana jiro oo karo dadaalkiisa iyo awoodda doonistiisa ku toobad keeni kara oo rumeysan kara.

Suuragal inooma ah sidaa inaan inaga waxyaalahaa samayno. Dhammaanteen waxeynu nahay dad daciif ah. laakiin Ilaah baa awooddaas oo idil leh. Waa inaan ka soo noqonaa oo aynu kas oo jeedsanaa dembiga, laakiin waa inaan Ilaah weyddiisanaa inuu inoo smeeyo runtii inan ka soo noqonno taas. Waa inaan aamminnaa Masiix, laakiin weyddiisanaa Ilaah iimmaankaa runta ah ina siiyo. Waa Ilaah ka kara/awooda inuu toobadkeenid iyo rumeysad ina siiyo. "Idinku waxaad ku badbaadeen nimco xagga rumeysadka; mana aha wax xaggiina ka yimid." Waa haddiyad!

Marka aannu noqonno Maiixiyiin laynama cafin keliya ee waxaynu galnay oo aan ku cusboonaanay si joogta ah xidhiidhka Ilaah. waxeynu ka mid noqonay caruurta qoyska Ilaah, dedna Isagu waa Aaabbahayaga janada ku jira. Oo Ilaah waa Ruuxa Qudduuska ku yimid ee iangu jira inaga, Ruuxa waxa uu ina siiyaa rabitaan/hawo cusub inaan ku noolaano Ciise Masiix. MAsiixiyiinta way yaqaaniin jacaylka Masiix iyo dareenka dayntaa aannu weligeen bixin kareynin. Ruuxa Qudduuska weyn ayay shaqadiisa tahay inuu ka dhex shaqeeyo Masiixiyiinta oo ka go'an Isaga ugu keeno janada nabdoon. Masiixiyiintana way karaan inay ugu gabyaan sidatan:

Isaga ayay ka timid kii i jeclaaday,
Aniga aad baan u fiicnahay,
Xoog maxay ah nataydu heshay
kuna noolaatay ama ku dhimatay,
ama arlada, ama cadaabta?
Maya; Weligey waan la jiri doonaa!

1. Efesos 2:8.
2. Rooma 8: 14-17; 1 Korintos 12:3; Filiboy 2:12-13; Filoboy 1:6

## *Cid Kale Miyey Igala Hadli Kartaa Ilaah?*

Dadka kale wey kuu baryi karaan Ilaah, laakiin ma jirto cid Masiixi kaa dhigi karto. Noqoshada masiixinimada, waa

inaad badbaado, waa wax ka dhaxeeya adiga iyo Ciise Masiix., mana jirto cid kale oo si toos u soo dhexgeli kartaa. Miyaad ka xun tahay dembiyadaada oo ma dooneysaa inay kaa dhamaato xukunka noloshaada? Ma dooneysaa inaad ka badbaadid xukunka iman doono? Ma dooneysaa inaad garato Masiix inuu kuu ahaado saaxiib iyo Sayid? Haddaba Ereyga Ilaah sidan buu ku leeyahay;

"Rabbiga doondoona inta Isaga la heli karo, oo Isaga barya intuu dhow yahay. Ka sharka leh jidkiisa ha ka tago, ninka aan xaqa ahaynuna fikirradiis, oo Rabbiga ha u soo noqdo, oo isna wuu u naxariisan doonaa, oo ha u yomaado Ilaaheena, waayo, aa buu u saamixi doonaa."

Waad heli dontaa meehsa ay ahayd inaad keli ku noqoto, oo raadinta Ilaah waxeyn ku jirtaa baryada.

***Baryaayo? Maxaan Idhaahdaa Markaan Ilaah***

Ilaah ma daneeyo ereyo qurux badan iyo khdudbado heer sare ah. Laakiin, wuxuu dhegeystaa qof walboo si daacad ah u doonayo inuu la hadlo Isaga. Waxay doonaanba ha noqdeene kelmadaha aad isticmaashay, haddaba kolka aad baryeyso waa inaad:

U qirto dembiyadaada Ilaah. U qirto iey dembiyadaada sharta ah ay gef ku yihiin Ilaah oo ay meel u taallo in loo dirayo naarta kuwaa. U sheeg Ilaah in aadan awood u lahayn inaad isbadbaadiso adiga qudhaada. Weyddiiso Rabbi Ciise Masiix inuu kaa caawiyo toobadkeenidda iyo

rumeysadkaba. Weyddiiso inuu kaa badbaadiyo. U sheeg Ciise in aad dooneyso inuu kuu ahado sida Rabbiga noloshaada. Deedna aamin Ilaah inuu ku maqlay oo uu ka soo jawaabi doono baryadaada, sababta oo ah Ciise awgii, sida ku xusan ballamadiisa ku jira Kitaabka Qudduuska:

"Ku alla kii magaca Rabbiga ku baryaa, waa badbaadi doonaa."

Ciise wuxuu la hadlay nin ku baryootanmayay in dembiyadiis la cafiyo:

"Laakiin canshuur qaadihii meel fog ayuu istaagay, ma uunan dooneynin inuu indhihiis circa u qado, laakiin laabtiisa ayuu garaacayay isagoo leh, Ilaahayow ii naxariiso anigoo dembi leh. Waxaan idinku leeyahay, kan iyo kii kale, kan baa gurigiisii tegey isagoo la caddeeyey inuu xaq yahay; Waayo, mid kastoo isa sarreysiiya waa la hooseysiin doonaa. "

1. Rooma 10:13; Sabuurrada 34:6 Falimaha Rasuullada 2:21; Cibraaniyadda 10:23; Yooxanaa 5:24.
2. Luukos 18:13-14.

## *Maxaan Sameeyaa oo Xiga?*

Waxaa jira laba shey oo muhiim ah in la sameeyo:

Midda koowaad: Haddii aadan heysanin Kitaabka Qudduuska waa inaad heshaa mid un, oo aad bilowdaa akhrisntiisa. Waxaadna ku bilaabi kartaa akhrinta kutubka Injiilka sida Yooxanaa u qoray. Ilaah baa ah qoraaga soo saaraha u ahaa Kitaabka Qudduuska oo idil. Ciise Masiix marwalba dadka wuxuu kala hadli jiray iney akhriyaan.

Midda labaad: Sida ugu dhakhsiyaha badan, waa inad u tagtaa saaxiib Masiixi ah oo u sheegataa waxaad samayn lahayd. Haddii aadan saaxiibo lahaynna waa inaad isku daydaa inaad hesho Masiixiyiin kaniisadda aaminsan Kitaabka Qudduuska iyo iney dadka u sheegaan. Halkaa, waa wax aad muhiim u ah inaad hesho saaxiibo Masiixiyiin ah sida ugu dhakhsaha bad nee suuragal kuu ah. Waad aqoonsan doontaa iyaga sababtoo ah wey jecel yihiin Masiix oo rumeysan yihiin Isaga, addeecaana Ereyga, Kitaabka Qudduuska. "I soo eega, oo kulligiin badbaada, waayo, anigaa Ilaah ah oo aniga Mooyeene mid kale ma jiro."

1. Yoxanaa 20:31.
2. Ishacyaah 45:12